# WAR-SAXAAFADEED

## SOOMAALIYA OO DAAHFURTAY SHARCIGA CADAALADDA DA'YARTA SOOMAALIYEED

**18 AGOOSTO 2026 MUQDISHO**

**Wasaaradda Cadaaladda iyo Arrimaha Dastuurka** ee Dawladda Federaalka Soomaaliya ayaa 16 Agoosto 2026 Muqdisho ku qabatay Munaasabadda Qaran ee Daahfurka Sharciga Cadaaladda Da'yarta Soomaaliyeed **(Sharci Lr. 48 ee 19 Janaayo 2026).** Daahfurku wuxuu muujinayay ka-go'naanshaha Dawladda ee hirgelinta hannaan cadaaladeed oo ilaaliya karaamada, xuquuqda iyo danta ugu wanaagsan ee da'yarta hor-imaata nidaamka cadaaladda dalka.

Sharcigu wuxuu dejinayaa habraacyo gaar ah oo khuseeya qabashada, haynta, baarista, dacwad-oogista iyo maxkamadeynta da'yarta; wuxuu dhisayaa hay'ado iyo adeegyo u gaar ah carruurta; wuxuuna mudnaan siinayaa kaalmo-sharciyeedka, fududeynta kiisaska da'yarta marka sharcigu oggol yahay, dhaqan-celinta iyo dib-u-dhexgalka bulshada ee carruurta. Waxaa kale oo uu xaqiijinayaa in xorriyad-ka-qaadista da'yartu noqoto tallaabada ugu dambaysa, da'yartana laga sooco dadka waaweyn marka la hayo.

## KA-QEYB-GAL IYO BALLANQAAD WADAJIR AH:

Munaasabadda waxaa ka qeyb-galay wakiillo ka socday bahda cadaaladda, Baarlamaanka Federaalka, Booliska, Ciidanka Asluubta, Dawlad-goboleedyada, Guddiga Madax-bannaan ee Xuquuqda Aadanaha, hay'adaha Qaramada Midoobay, saaxiibada horumarinta iyo bulshada rayidka ah.

Ka-qeyb-galayaashu waxay adkeeyeen in guusha sharciga lagu cabbiri doono hirgelintiisa maalinlaha ah - laga billaabo saldhigyada booliska iyo xafiisyada xeer-ilaalinta ilaa maxkamadaha, xarumaha dhaqan-celinta, adeegyada bulshada, qoysaska iyo bulshada.

## MUDNAANTA HIRGELINTA:

- Diyaarinta xeer-nidaamiyeyaasha, habraacyada hawlgalka iyo nidaam gudbin oo hay'adaha isku xira;
- Tababarka garsoorayaasha, xeer-ilaaliyeyaasha, booliska, shaqaalaha asluubta iyo shaqaalaha adeegayaasha bulshada;
- Xoojinta kaalmo-sharciyeed bilaash ah iyo habraacyo uu ilmuhu fahmi karo;
- Hirgelinta fududeynta kiisaska carruurta iyo tallaabooyinka aan xabsiga ahayn marka sharcigu oggol yahay;
- Horumarinta xarumaha iyo adeegyada dhaqan-celinta, waxbarashada iyo nidaamyada dib-u-dhexgalka bulshada ee carruurta.

## BAAQ:

Wasaaraddu waxay ugu baaqaysaa Dawladda Federaalka Soomaaliya iyo Dawlad-goboleedyada inay hirgelinta Sharciga Cadaaladda Da'yarta Soomaaliyeed ku daraan qorshayaashooda iyo miisaaniyadahooda, una qoondeeyaan agabka lagama-maarmaanka u ah dhaqan-gelinta sharciga. Waxay sidoo kale ugu baaqaysaa hay'adaha cadaaladda, bulshada rayidka ah, qoysaska, culimada, odayaasha dhaqanka iyo bulshada Soomaaliyeed inay door muuqda ka qaataan ilaalinta, dhaqan-celinta iyo dib-u-dhexgalka bulshada ee carruurta.

## MAHADNAQ:

Wasaaraddu waxay u mahadcelinaysaa Madaxweynaha JFS Dr Xasan Sheekh Maxamuud, hay'adaha sharci-diyaarinta, Golaha Wasiirrada, labada Aqal ee Baarlamaanka iyo hay'adihii gacanta ka geystay dhammeystirka iyo meelmarinta sharcigan

**DHAMMAAD**